UNITED NATIONS **NATIONS UNIES**

Office for the Coordination of Humanitarian Affairs (OCHA) – SOMALIA

Warbixinta Xaaladda # 39 – 01 October, 2008

Is-beddellada guud ee ugu muhiimsan

Iska horimaadyo dagaal iyo weerarro dheeraad ah ayaa toddobaadkan ka dhacay magaalada Muqdishu. In ka badan 25 qof ayaa lagu soo warramay inay ku dhinteen, iyadoo 50 kalana ay ku dhaawacmeen, kuwaasoo ay sababeen hubka calculus ee aan loo meel dayin oo lala beegsanayey goobaha ay dadka rayidka ah degen yihiin. Waxayna hay'adda QM ugu qaabilsan arrimaha qaxootigu ku qiyaastay ilaa 30,000 qof in lagu khasbay inay dagaallada muqdishu ka dhacayey ka cararaan ilaa 20kii September. Qaar dadkaas ka mid ahaa ayaa u cararay goobaha xasiloon ee magaalada Muqdishu, halka ay qaar kalena u guureen dhinaca waddada Afgooye, kuwaasoo ku biiray dadkii gaarayey in ka badan ilaa 300,000 oo hore goobahaas ugu bara-kacay(IDPs), iyagoo horeba xaaladda heer-nololeedkooda laga dayrinayey.

Isku-duwaha hawlgallada Bini'aadminnimada QM ee Soomaaliya, Mark Bowden, ayaa war-saxaafadeed uu soo saaray 26kii September, wuxuu ugu baaqay dhammaan dhinacyada ku dagaallamaya dalka inay xurmeeyaan sharciga caalamiga ah ee bini'aadminnimada, ayna joojiyaan istimaalka hubka aan loom eel dayin iyo weerarrada ka dhanka ah goobaha ay dadka rayidka ahi degan yihiin,islamarkaana ay u oggolaadaan fursad markasta oo ay dadkaasi gargaar u baahdaan in la gaarsiiyo. “Dagaallada dib uga soo cusboonaaday Muqdishu, dabayaaqadii toddobaadkan, ayaa waxa sii xumeeyeen xaaladdii liidatay ee bani-aadnimo ee horeba uga jirtay dalka Soomaaliya. Qiyaas baaxad leh oo dadweynaha ka mid ah ayaa imminka u baahan gargaar dheeraad ah.” Ayuu intaas raaciyey.

Waxaa toddobaadkan gudihiisa ka sii dartay xaaladda ammaanka ee magaalada Muqdishu, iyadoo ay sii korodhay tirada jidgooyooyinka magaalada Muqdishu oo ay koontaroolayaan kooxo kala duwan, taasoo saamayn ku yeelatay gaadiidka qaada raashinka mashruuca Jikooyinka ee ay taageeraan hay'adda WFP iyo la-hawlgalayaasheeda. Waxaana lagu soo waramayaa in dhac iyo boob loo gaystay gaadiidkaas raashinka siday. Inkastoo ay caqabadahaasi jireen, haddana wuxuu raashinka mashruuca Jikooyinka uu badbaadiyey ilaa 14 million oo cunto-xilliyeedkaas laga hirgeliyey 16-ka degmo ee magaalada Muqdishu iyagu ka faa'iidaystay. Waxaana tirada haweenka cuntada bisil/karsan ka faaii'daystay ay gaaraysay boqolkiiba (56%) iyadoo carruurtana lagu qiyaasay boqolkiiba (38%), waxaana sare u sii kacaya heerka baahida halaaks ka jirta. Sida uu tilmaamayo sahanka ay hay'adda la-hawlgalka SAACID samaysay, waxaa sii kordhaya tirada haweenka iyo carruurta ka soo laabanaya min waddada Afgooye, si ay fursad ugu helaan cuntada bisl/karsan, halka ay weli raggu ku sii negaanayaan dhinaca Afgooye oo ay weli ka helaan raashin qalalan/engegan.

Waxaa dhawaan si nabadgelyo ah ku soo gaaray Muqdishu markabkii ugu ballaarnaa ee noocii ah oo ay heshiis la gasho hay'adda WFP,kaasoo ka yimid dalka KoofurAfrika 27kii September,wuxuuna siday siday galley dhan ilaa 13,770 metric tons,isagoo uu galbinayey markab laga leeyahay dalka Canada. Ilaa imminka waxay maraakiibta Canada soo galbiyeen shan markab oo WFP heshiis la gashay oo soo gaaray Muqdishu ilaa 18kii August, kuwaasoo wadartoodu gaaraysay 36,360 metric tons oyo kala duwan oo raashin ah. Waxa markii hore jadwalka heshiiska lagu xusay in maraakiibtaasi ay hawlgalkoda soo af-jaraan 27kii September, balse waxaa la kordhiyey ilaa 23ka October 2008.

Sida ay xaqiijisay hay'adda Caafimaadka Adduunka(WHO), waxaa Cisbitaalka Guud ee Marka ee gobolka shabeelaha Hoose, la dhigay 329 bukaan oo uu ku dhacay cudurka ba'an ee Shuban-biyoodka ah (AWD) ilaa markii uu cudurku dilaacay bishii August, waxaase la xakameeyey shubankii xad-dahaafka ah ee halkaas ka jiray. Intii u dhaxaysay 18kii August iyo 19kii September, 22 bukaan oo daacuun ku dhacay, ayaa laga xaqiijiyey Shaybaarka Kenya. Waxaa kaloo warbixintu sheegaysaa in afar bukaan oo da'doodu ka yar tahay shan sano ay iyaguna u cudurkaas u dhinteen. Bishii August, waxay waaxda Gurmadka iyo Digniinta hore ee hay'adda WHO(EWARS), baaritaanno ay samaysay ku xaqiijisay inay sii kordhayaan tirada bukaannada Shuban-biyoodka(AWD) ee deegaanka Marka. Ilaa bishii May 2008, markii la bilaabay ololaha Waaxda Gurmadka iyo Digniinta hore, waxa wadarta bukaannadu ay gaarayeen ilaa 5,725, iyadoo 25 bukaan ay ugu dhinteen Gobolka Shabeelaha Hoose, sida ay warbxintu xustay. Degmada Marka, ayaa laga helay boqolkiiba 54% oo ka mid ah wadarta guud ee bukaanka, iyadoo boqolkiiba 68%, ay saamaysay arrimaha dhimashada la xiriira.Magaalada marka, waxay leedahay in ka badan ilaa 100 ceel oo gaar loo leeyahay, kuwaasoo intooda badan aan la daaweynin. Waxaana dadweynaha deegaanka la qadaa 500 Shillings Somali ah oo u dhiganta ($0.01) halkii

jirigaan(jerry can) oo ceelasha biyahooda la daaweeyo ah, taasoo aan inta badan dadweynuhu awoodin. Sidaas awgeed, inta badan waxay dadku isticmaalnaa biyaha aan la dawaynin.

Gurmadka iyo Farqiyada

Hay'adda UNICEF oo kaashnaysa hay'adaha aan dawliga ahayn(NGO) ee la-hawlgala, ayaa qalabka maacuunta ah u qaybiyey ilaa 8,000 qof oo kuy Muqdishu, taasoo qayb ka ah Gurmadka loogu talo galay dadkii dhawaan dagaallada ku bara-kacay. Waxayna hay'adda carruurtu sii kordhisay taageerada tallaalka iyo gargaarka dhinaca daawooyinka in ka badan 200,000 carruurta da'doodu ka yar tahay shanta sano iyo 50,000 hooyooyinka uurka leh ee magaalada Muqdishu. Intaas waxaa dheer, iyadoo hay'adda UNICEF ay taageero u fidiso labo ka mid ah goobaha nafaqaynta quudintas, shan xarumaha bukaan-socod-eegtooyinka ah iyo labo xarumaha xasiloonida iyo taabbagalinta ah, kuwaasoo loo sii marayo celcelis ahaan 1,400 bukaan ah oo xaaladdooda nafaqo-darro la xakameeyey iyo 1,800 carruur ah oo nafaqo-darro ba'an ay saamaysay ee ku sugan magaalada Muqdishu oo iyagana gargaar loo fidinayo bil kasta. Hawlgalka baahsan ee nooca nafaqanta dheeraadka ah (UNIMIX), ayaa sidoo kale waxaa la gaarsiinayaa bishiiba mar ilaa 10,000 oo carruurta da'doodu ka yar tahay shanta sano ee degan xeryaha dadka bara-kacay(IDPs) ee Kah Shiqaal iyo Daynile ee waqooyiga magaalada.

16kii September, waxay hay'adda WHO iyo la-hawlgalayaasheeduba muddo 14 cisho ah oo hawlo lagu qaybinayo dawo biyaha lagu nadiifiyo (280 kaniini oo halkii bukaan/qofkiiba la siinayo 20 litres oo biyo nadiif ah maalintii), ka bilowday gobolka Shabeelaha Hoose, taasoo qayb ka ah gurmadka lagu xakamaynayo shuabn biyoodka (AWD) halkaas ka dilaacay. Waxaana gargaarkan loo qaybiyey bukaannada Cisbitaallada ka soo baxay, kaddib markii lagu daweeyey xarumaha cudurka daacuunka. 540,000 qof oo kale, ayaa waxaa gargaar qaybin iyo wacyi-gelin bulsho isugu jiray u fidiyey hay'adda caalamiga ah ee aan dawliga ahayd(INGO) ee (COSV) iyo hay'adaha aan dawliga ahayn ee maxalliga ah (NGO) ee IIDA, Ayuub iyo New Way. Waxaa kaloo farriimaha caafimaadka asaasiga ah ee ku wejahan dhinacyada dadka, deegaanka iyo nadaafadda cuntada ee Soomaaliya, laga sii daayey Raadiyaha Marka.

Wixii Faahfaahin Dheeraad ah ee xogta Afka Ingriiska kala xidhiidh: Rita Maingi tel. 254 734 800 120 – *maingi@un.org*,
Xogta Afka Soomaaligana kala Xidhiidh: Mona Mohamed on 0733 643 737 – mohamed26@un.org
Cinwaanka Shabakadda:http://ochaonline.un.org/somalia